

Hoggaanka Macluumaadka Kaxeysashada iyo Dhibaateynta Dhallinyarada



Waa maxay kaxeysashada dhallinyarada?

Kaxeysashada dhallinyarada waa wax dhaca marka uu qof maskaxda ka xado ama xukumo dhallinta si uu uga faa'iido isagoo ku shaqeysanaya ama jirkooda sii iibinaya. Sida uu dhigayo sharciga Minnesota, kaxeysashada dhallinyarada siyaabo kala duwan ayey u dhici kartaa. Sida uu dhigayo sharciga dowladda dhexe, kaxeysashada waxay noqon kartaa mid si xoog ah loo sameeyo, mid khiyaamo ah, ama mid dhibbanaha lagu khasbo in uu sameeyo adeeg ah galmo looga ganacsado jirka qofka. Dhallinyarada ah dhibbaneyaasha la kaxeysto kama bixi karaan xaaladda ay ku jiraan siyaabo badan awgood.

Si ay dhibbaneyaasha u xakameeyaan, dadka kaxeysta waxay isticmaalaan waxyaabo badan oo ka mid ah, balse aan ku ekeyn:

- Caga-jugleyn
- Khasbid iyo hanjabaad
- Silcin (niyad ahaan, jir ahaan, galmo ahaan)
- Go'doomin
- Wax-u-diidid, eedeyn iyo khuursasho
- Xuquuq gaar ahaaneed iyo sarreysiin
- Silcin dhaqaale
- Wax lagu khasbo qoyska dhibbanaha
- Waraaqo muhiim ah oo laga qaato

Xaqiiqa ahaantii ma jirto hal calaamad oo keliya oo lagu garan karo dadka dhallinyarada kaxeysta. Waxa ugu muhiimsan waa in la ogaado dadka dhallinta kaxeysta siyaabaha ay ku adeegsadaan ee ay wax ku xukumaan

Waa maxay dhibaateyntu?

Dhibaateyntu waa wax dhaca marka uu qof ugu hanjabo qof kale inuu si aan sax ahayn shaqadooda uga faa'iido. Awoodda labada dhinac ee danbiilaha iyo dhibbanaha ayaan is le'ekeyn, oo danbiilaha ayaa labadooda awood weyn. Dhibaateyntu waa meel dhexe ee ay isugu imaan karaan xornimada buuxda iyo kaxeysashada dhallinyarada. Xaaladahaas waa isku mid oo dadku waxay la kulmi karaan meelo kala duwan oo u dhaxeeya xornimada iyo kaxeysasho ah wakhtiyo kala duwan.

Ganacsi ahaan dhibaateynta galmada waxa ay dhacdaa marka uu qof kale ka helo galmo uu ku beddesho wax kale oo qiimo u leh lacag, mukhaadaraad, cunto, hoy, kiro, ama magac sare oo ah ciyaal kooxo dagaallama. Dhibaateynta shaqada ah waa mid si caddaalad darro ah loogula kaco dad hab shaqo oo waxaa ka mid ah in mushaarka loo diido ama lacag yar la siiyo, ama in laga khiyaamo (iyadoo si sharci ama heshiis ah looga haysanayo mushaar loo ballanqaaday, sida saacado dheeraad ah).

Waayo dadka dhallinyarada kaxeysta iyo kuwa ka iibsada?

Qof kasta iyo da' kasta, isir kasta, qowmiyad ama jinsi kasta ayaa la kaxeysan karaa. Dadka dhallinyarada kaxeysta waxay noqon karaan qaraabo ama asxaabta qoyska, ama xataa waxay noqon karaa saaxiibka jaceylka, dad isqaba midkood.

Sida dadka dhallinyarada kaxeysta, kuwa iibsanaya waxay noqon karaan qof kasta iyo da' kasta, isir kasta, qowmiyad ama jinsi kasta. Waxay ka imaan karaan magaalada, miyiga, ama meelaha magaalada ka baxsan. Dadka wax iibsanaya waxay isticmaalaan internet, inay toos ula kulmaan iyo in ay dad kale ugu sheegaan in laga ganacsado galmada jirka.

Waayo dhibbaneyaashu?

Qof kasta ayaa noqon kara dhibbane loo kaxeystay galmo. Dhibbaneyaasha/kuwa ka soo badbaada meel kasta ayey ka soo jeedaan, isir kasta, jinsi kasta, dookha jinsi kasta, dhalashada waddan kasta, iyo xaaladda dhaqaale kasta.

Dadka dhallinyarada kaxeysta waxay abbaaraan qof kasta, oo sabab ay noqotaba, ah qof u nugul inay maskaxda ka xadaan iyo in ay xukumaan. Xaaladaha bulshada ee qowmiyad kasta, sida heerka shaqa la'aanta oo aad u sarreeya ama fursad la'aan jirta, ayaa dadka dhallinyarada kaxeysta u sahasha in ay helaan dhibbaneyaal. Xaaladaha kordhiya halista lagu kaxeysto dhallinyarada waxaa ka mid ah:

- Saboolnimo
- Shaqa-la'aan
- Dookha iyo is-aqoonsiga jinsiga ee qofka
- Da'da – carruur, dhallinyaro, waayeel
- Xaalad muhaajirnimo
- Isir tiro yar
- Qofka hore loo soo dhibay
- Qof qabatimay daroogo
- Xaalad naafannimo
- Xaalad darbi-jiifid

Sidee baan uga hadlaa kaxeysashada dhallinyarada?

Ereyada aan isticmaalno ayaa qaab u yeela sidaan wax u aragno dareen jira iyo dadka kale. Waxaa muhiim ah in la isticmaalo erayo yareeya ceebeynta iyo in lagu caawiyo in ay dadku dareemaan inaan la necbeyn si aysan waxba nooga qarin oo ay wax kasta noogu sheegaan iyagoo aan wax ceeb ah ka baqeyn. Isticmaal taxaddar iyo erayo ku habboon sida in dadka lagu dhibaateeyo ganacsiga jirka, dad ah dhibbaneyaal la kaxeystay, qof ka soo badbaaday, ama qof lagula kacay dhibaateyn ama kaxeysasho.

Maxaan sameynayaa haddii aan ka shakiyo kaxeysashada dhallinyarada?

- La soo xiriir [xafiiska Safe Harbor Regional Navigator \(http://www.health.state.mn.us/communities/safeharbor/response/navigators.html\)](http://www.health.state.mn.us/communities/safeharbor/response/navigators.html) ama la soo xiriir taleefanka lacag la'aanta ee Day One Hotline oo ah 1-866-223-1111 si aad u dhageysato adeegyada loo hayo deegaankaaga.
- Markaad ka shakiso xaalad ah in dhallinyaro la kaxeysanayo ku soo sheeg foomka ogeysiiska ee xafiiska qabashada danbiyada ee Bureau of Criminal Apprehension's (BCA) Tip Form, ama soo garaac taleefanka BCA oo ah 1-877-996-6222 ama farriin ugu soo dir bca.tips@state.mn.us
- Soo garaac 911 marka adiga ama qof aad garaneyso aad ku jirtaan halis degdeg ah.

Macluumaadyo

- [Minnesota Safe Harbor \(https://www.health.state.mn.us/communities/safeharbor/index.html\)](https://www.health.state.mn.us/communities/safeharbor/index.html)
- Minnesota Day One Crisis Hotline - 866-223-1111

